


**FAAFINTA**

الرسمية



**RASMIGA**

الجريدة

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

لولاية أرض بونت الصومال

*Sanadka 8-aad Garowe 22, Jenuary, 2006*

*lam 1*

*Faafinta bilwalba soo baxda*

جريدة الشهرية

*Qaybta faafinta rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland*  
*Qiimuhu waa Sh/So. 10,000 Lambar walba. Rukunka Sanadkii waa Sh/So. 170,000 dalka gudahiisa, dibadda Sh/So. 500,000 Rukunka la weydiisto wakhtiga loo gooyay wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh/So. 3,000 Rukunka iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa qaybta maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda.*

## **TUSMADA**

Qaybta Kowaad

Sharci

Qaybta Labaad

Xeer

Waxba Ma Leh

Qaybta Sadexaad

*Talooyin, isgaarsiin, ogaysiis, iidheh, IWM*

*Waxba ma leh*

Sharci Lr. 3. ee 22/01/2006, kuna saabsan sharciga Kordhinta khidmadda PSAWEN.

**DAWLAD G. PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA**  
Xafiiska Madaxweynaha



**PUNTLAND STATE  
OF SOMALIA**  
Office of the President

*Sharci Lr. 3 ee ku saabsan kordhinta Khidmad loo kordhiyey Hay'adda PSAWEN*

**MADAXWEYNUHU**

- MARKUU ARKAY Qodobka 54-aad (14) farqadiisa 14-aad ee Dastuurka Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya.
- MARKUU ARKAY Muhiimadda khidmaddan la sharciyeeyey dalka u leedahay.
- MARKUU DHEGAYSTAY Ra'yiga Golaha Xukuumaddu ka qabto khidmaddan.
- MARKUU ARKAY Ansixinta Golaha Wakiilladu Ansixiyeen sida ku cad Go'aanka Golaha ee XGGW/DGPL/236/2005, ee 26/12/2005

**WUXUU SOO SAARAY**

Sharciga soo socda:-

**Qodobka Kowaad**


Sharcigan kordhinta khidmadda Hay'adda PSAWEN Golaha wakiilladu waa ansixiyeen.

**Qodobka Labaad**

Nuqulada asalka ah waxaa lagu kala kaydinaayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan Garyaqaanka guud iyo kan Xoghayaha Gollaha Wakiillada..

**Qodobka Saddexaad**

Sharcigani waxa uu dhaqan-gelayaa marka Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, markaa ayaa sharciga kamid noqonayaa shuruucda Puntland qof kastana ay waajib ku noqonaysaa inuu dhawro, kuna dhaqmo.

  
Maxamuud Muuse Xirsi  
Madaxweynaha Dawladda Puntland



**HAY'ADDA BIYAHA, TAMARTA & KHAYRAADKA DABIICIGA**  
**WATER, ENERGY AND NATURAL RESOURCES CORPORATION**  
**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**



# PSAWEN

Summad :  
Ref :

Taariikh : / /  
Date :

## Soo koobidda Miisaaniyadda Hay'adda PSAWEN Ee Sanaddka 2006

### Kharashka/ Dakhliga Sh.So.(000,000)

Tilmaan	Kharashka Hawlaha Socda	Kharashka Maamulka	Wadar	Dakhliga Khidmadaha PSAWEN	Dakhliga Deeqda Dawladda	Wadar
Miisaaniyadda <b>2006</b>	2,178.0	2,262.0	4,440.0	2,454.0	1,986.0	4,440.0

### Talo galka Kharashka Miisaaniyadda PSAWEN

SR	Tilmaan	Qiyaasta Kharash Bileed(Sh.So)	Qiyaasta Kharash Sanadeed(Sh.So)
	<b>Kharashka Hawlaha socda</b>		<b>2,178.000.000</b>
1.	Mushahar Shaqaale	124,700,000	1,496,400,000
2.	Guno Shaqaale	40,800,000	489,600,000
3.	Kiro Gaari	6000,000	72,000,000
4.	Dibu Habaynta iyo Dayactirka	10,000,000	120,000,000
	<b>Kharashka Maamulka</b>		<b>2,262,000,000</b>
5.	Safarda iyo Kormeerka	5,000,000	60,000,000
6.	Shidaalka	4,000,000	48,000,000
7.	Isgaarsiinta	2,000,000	24,000,000
8.	Qalabka Xafiisyada	5,000,000	60,000,000
9.	Nalka iyo Biyaha	7,000,000	84,000,000
10.	Dayactirka iyo Horumarinta Ceelasha Miyiga	40,000,000	480,000,000
11.	Shidaalka Saldhigyada Korontada	125,500,000	1,506,000,000
<b>12.</b>	<b>Wadar</b>	<b>370,000,000</b>	<b>4,440.000,000</b>

### Talagalka Dakhliga Miisaaniyadda PSAWEN 2006

SR	Tilmaan	Qiyaasta Dakhli Bileedka(SH.So)	Qiyaasta Dakhli Sanadeedka(Sh.So)
	<b>Surtax</b>		<b>1,626,000,000</b>
1.	Qalbka Soodega ee korontada iyo Matoorrada,10%	14,000,000	168,000,000
2.	Saamiga PSAWEN ku leedahay Shidaalka Socdega 10,000 Sh.So Fuustadii	100,000,000	1,200,000,000
3.	Qalabka Soodega ee Biyaha 10%	14,000,000	168,000,000
4.	Dhagaxa Dhismaha	2,000,000	24,000,000
5.	Ciidda iyo Niiska	2,000,000	24,000,000
6.	Dhuxusha	1,200,000	14,400,000
7.	Diiwaan gelinta Ceelasha Isticmaalka Gaar ahaaneed leh	1,000,000	12,000,000
8.	Diiwaan gelinta Matoorrada korontada dhaliya	1,300,000	15,600,000
	<b>Surcharge</b>		<b>828,000,000</b>
9.	Mu'asasada korontada qaybiya	39,000,000	468,000,000
10.	Mu'asasada Biyaha Qaybiya	30,000,000	360,000,000
	<b>Deeqda Dawladda</b>		<b>1,986,000,000</b>
11.	Dayac tika iyo Horumarinta Ceelasha Miyiga	40,000,000	480,000,000
12.	Shidaalka Saldhigyada Korontada	125,500,000	1,506,000,000
	<b>Wadar</b>	<b>370,000,000</b>	<b>4,440,000,000</b>

**Jaan goynta Khidmadaha Cusub Ama la kordhiyey**

<b>SR</b>	<b>Tilmaan</b>	<b>Khidmaddii Hore</b>	<b>Khidmadda Cusub</b>
1.	Surtax-ka Shidaalka Soodega	5000 Sh.So Fuustadii	10,000 Sh.So.Fuustadii
2.	Surchage-ka Mu'asasada Korontada Qaybiya	100 Sh.So/Kwt	500 Sh.So/Kwt
3.	Surtax-ka Qalabka Biyaha		10%
4.	Dhoobada iyo Niiska		5000 Sh.So/laord
5.	Dhagaxa Dhismaha		10,000 Sh.So/Laord

**Madaxweynaha D.G.PL**  
**Max'ud Muusse Xirsi**

---